

## Waa maxay EPSDT?

EPSDT (Baaritaanka Hore ee Muddo Kadibba Mar La Sameeyo, Aqoonsashada Cudurka, iyo Daaweynta) waa dheefta daryeelka caafimaadka ka hortagga ah ee dhammeystiran.

Shakhsiyaadka, ay da'doodu ka yar tahay 21 sano, ee ku qoran caymiska Apple Health (Medicaid) waxay xaq u leeyihiin EPSDT. Dheeftan bilaashka ah waxaa ka mid ah baaritaannada dhallaanka wacan ee joogtada ah ee ka caawiya bixiyaha adeegga daryeelka caafimaadka dhallaankaaga in uu oggaado oo dabiibo dhibaatooyinka waqti hore.

## Maxaa dhacaya inta lagu guda jirro baaritaanka dhallaanka wacan?

Cunuggaaga ama dhalinkaaga waxaa lagu sameyn doonaa baaritaan jireed oo dhammeystiran oo looga hadlayo mowduucyada aanan lagu darin booqashooyinka cunugga xannuunsan, oo ay ka mid yihiin.

- Taariikhda caafimaadka qoyska
- Sida uu ilmahaagu u korayo
- Tallaalada ama baaritaanada loo baahan yahay
- Baaritaanka maqalka ama aragga
- Baaritaanka macdanta birta (lead)
- Dhibaatooyinka wax cunista ama hurdo-xumada
- Caafimaadka afka
- Baaritaannada caafimaadka habdhaqanka iyo koboca
- Walaacyada waalidka/daryeelaha

## Waa kuma cidda ay tahay in ay hesho baaritaannada carruurta caafimaadqabta?

Shakhsiyaadka da'doodu ay ka yar tahay 21 sano waa in ay si joogto ah u arkaan takhtarkooda ama takhtarkooda ilaha, xitaa haddii aysan xannuunsanayn. Baaritaanaddu waa wakhtiga takhtarku la weyddiin karo su'aalaha ku saabsan walaac kastoo caafimaadka laga qabo. Booqashada bixiyaha adeegga carruurtaada marka aysan xannuunsaneen waa fursad aad ku halayso hagid caawin karta adiga ama cunuggaaga.



## Waa goormee goorta ay carruurtu helayaan baaritaanka?

Wac bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka si aad ballan ugu qaadato una weyddiisato baaritaanka EPSDT. Ugu yaraan, cunuggaaga waa in uu baaritaanka ku helo da'yadan soo socda:

- **Ka hor da'da 1:** 1 toddobaad, 1 bil, 2 bilood, 4 bilood, 6 bilood, iyo 9 bilood
- **Da'aadda 1 – 4 sano:** 12 bilood, 15 bilood, 18 bilood, 24 bilood, 30 bilood, 3 sano, iyo 4 sano
- **Da'aadda 5 – 20 sano:** hal-jeer sannadkii

Bixiyahaaga ayaa kaa caawin kara in aad hesho jadwalka sida ugu wanaagsan ugu shaqeeya cunuggaaga.



## Waa maxay tallaalada ay carruurtu u baahan yihiin?

Tallaalada waxay ka caawinayaan cunuggaaga iyo qoyskaaguba in ay caafimaadqabaan. Si aad u oggaato tallaalada uu cunuggaaga u baahan yahay, booqo **cdc.gov/vaccines**.

## Sidee loo tallaalaa cunugeyga?

Adeeg bixiyahaaga weyddii in uu kuu jadwaleeyo tallaalada lagu taliyay si aad uga ilaaliso cunuggaaga iyo qoyskaagaba cudurrada loogaga hortagi karo tallaalada.

## Maxay tahay sababta carruurta loo tallaalo?

La-socoshada jadwallada tallaalada waxay gacan kaa siinaysaa:

- Ilaalinta caafimaadqabka cunuggaaga iyo qoyskaaga
- Ilaalinta caafimaadqabka bulshadaada
- Joojinta cudurka in uu ku faafo dadka ugu nugul bulshada
- Sababtoo ah waalidiinta kale waxay tallaalayaan carruurtooda si ay uga dhigaan iyaga iyo bulshadeennaba kuwo caafimaadqaba oo amaan ah

## Adeegyada turjumaanka

Haddii aadan si fiican ugu hadlin luuqada Af Ingiriiska ama aad tahay dhagoole, Indhoole Dhagool ah, ama uu Kugu Adag Yahay Maqalka, turjumaanno xirfadlayaal ah ayaa lagu heli karaa luuqado badan, oo ay ku jiraan luuqadda dhagoolayaasha ee tilmaan bixinta oo lacag la'aan ah. Ogeysii shaqaalaha soo-dhaweynta in aad u baahan tahay tujumaan marka aad ballanta qabsanayso.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah booqo **hca.wa.gov/interpreter-services.**

## Naafonimada hadalka ama maqalka, ama dhibaatooyinka dhaqdhaqaaqa

Haddii aad qabtid naafonimada maqalka ama hadalka ah ama dhibaato dhaqdhaqaaq, waa in aad u sheegtaa shaqaalaha soo-dhaweynta marka aad ballantaada sameysato. Shaqaalaha soo-dhaweynta jooga rugta bixisa adeeggaaga caafiaadka ayaa kugu caawin doona qabanqaabo kasta oo lagama maarmaan ah.

## Adeegyada Gaadiidka

Waxaad xaq-u-yeellan kartaa caawimaadda gaadiidka lagu tagayo ballantaada daryeelka caafimaadka oo lacag la'aan ah. Ballantu waa in ay noqotaa mid loogu talogalay adeegyada caymiska Apple Health. Haddii aad caawimaad ugu baahan tahay helitaanka gaadiid ama takhtar ku sugan degaankaaga, fadlan wac 1-800-562-3022.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah: **hca.wa.gov/transportation-help**.

## Sida loo helo adeeg bixiye

### Caafimaadka Jireed iyo Kan Dabeecadda

- Wac qorshahaaga daryeelka la maareeyo
- Haddii aadan lahayn qorshaha daryeelka la maareeyo wac 1-800-562-3022

### Ilkaha

- **DentistLink.org**
- **Insurekidsnow.gov/find-a-dentist/index.html**
- **fortress.wa.gov/hca/p1findaprovider/**
- Wac 1-800-562-3022



Washington State Health Care Authority

Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) wuxuu u hoggaansamaa dhammaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka Washington iyo dowladda federaalka waxaana ka go'an in uu suurtageliyo in si siman loo helo adeegyadeenna. Haddii aad u baahan tahay diyaafadin, ama u baahan tahay dokumeentiyo ku qoran luuqad kale ama qaab kale ah, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

# EPSDT (Baaritaanka Hore ee Muddo Kadibba Mar La Sameeyo, Aqoonsashada Cudurka, iyo Daaweynta)

## Baaritaannada cunugga caafimaadqaba ee loogu talagalay carruurtaada ama dhallintaada



Washington Apple Health

HCA 19-0056 SM (12/22) Somali